



I caawi si aan u koro waa nidaam tageero dumarka uurka leh iyo caruurta yaryar iyo qoysaska Gobolka Ohio oo idil. Adeega iyo tageeradaba waxaa la bixiyaa iyadoo loo maraayo booqashada guryaha iyo faragelinta xilli hore(D'ada intay yar tahay)

Somali



Ohio

Department of Health

I caawi si aan u koro (Help Me Grow) barnaamijka la yiraahdo waa mid ikhtiyaari ah oo arimaha guriga ku saleysan lacag la'aana ah. Dadka guryaha soo booqda waa dad aad tababar u qabo kuwaaso isticmaalo hab naxariis leh oo bixiya macluumaad iyo taageero wakhtiga uurka saabsan, isla markaasna xoojinaysa waalid ahaan iyadoo isticmaalaaya xirfado,qalab,iyo kalsooni si loo kobciyo caafimaadka ilmaha xiliyada ugu horeeya nolashiisa.

Yaa xaq u leh in uu ka qayb qaato barnaamijkaan?
Haweenka uurka leh iyo qoysaska ilmaha yaryar haysta.

Maxaad ka filan kartaa barnaamijkaan?
Markii reerkaaga la soo gudbiyo ,waxaa la soo booqan doona gurigaaga. Dadka barnaamijkaan ka socda oo booqashada gurigaaga ku imaan doona waxay ku siin doonaan tageero daryeel iyo macluumaad la isku halayn karo oo ku saabsan uurka iyo koritaanka ilmaha hadii ay ahaan lahayd uur caafimaad leh,sida loo xakameeyo oohinta ilmahaaga,sida loo maamulo hurdada adiga iyo ilmahaba,ama sida loola tacaalo walbahaarka waalidiinta. Dadkaas ku soo booqanaya muhimdooda koowaad waa siday kuu caawin lahaayeen, sidoo kale waxay kugu xiraayaan ilaha bulshada ee kaale duwan illa inta ay baahidaada ay tahay. Waxay kugu dhiirigelinayaan sidii go'aanada aad kaliga ku gaari lahayd waxa adiga iyo ilmahaaga u fiican.

Faa'iidooyinka booqashada guriga:
Dhalasho caafimaad leh-Haweenka uurka leh oo ka qayb qaatay HV waxay haysteen 48% ilmaha miisaanka yar ku dhasha-Kordhinta ama diyaargarow xoogan ilmaha dhanka wax aqrinta iskuulka ah. Caruurta ka qayb qaadatay HV waxay 25% ka sareeyaan natiijadooda aqrinta fasalka sadexaad iyo maadada xisaabtaba.



Uur ma leedahay ama ilmo yar ma korisaa?

Hada u baahan tahay baradhada program kan ama in saxiixdid waad subin karta:

Wac: 1-800-755-GROW (4769)

Booqo website kan: www.helpmegrow.org

Ma ka welwelsan tahay ilmahaada koritaankooda?



Ohio Department of Developmental Disabilities

I caawi si aan u koro (Help Me Grow) ka hortaga xilli hore baarnaamijka ah wuxuu tageeraa qoysaska caruurta yaryar oo leh dib dhac xaga koriinka ah iyo naafanimo. Adeegyadaas waxaa lagu bixiyaa gurigaaga dhexdiisa iyo meelaha kale oo ay qoyskaaga waqtiga ku qaataan, waxay kaloo dhisaan awoodaada aad ku kobcin kartid waxbarashada iyo horumarka ilmahaaga.

Yaa xaq u leh in uu ka qayb qaato barnaamijkaan?
Ilmaha iyo kuwa socod baradka ah laga bilaabo waqtiga dhalashada illaa sanadka sadexaad marka ay jirto walaac ku saabsan horumarka ama baaritaanka caafimaad oo laga yaabo in uu saamayn ku yeelan karo horumarka.

Maxaad ka filan kartaa barnaamijkaan?
Marka lagugu wargeliyo ka dib waxaa lagu soo magaabaya qof isku duwo ah(Isku duwo barnaamij) kaaso u adeegi doona qoyskaaga isla markaasna ka caawin doona qoyskaaga safarkaaga hadii uu ilamahaaga u qalmo barnaamijkaan. Isku duwaha ayaa heli doona ogolaanshahaaga si uu u buuxiyo qiimeynta cunuga iyo qoyska. Kooxda barnaamijkaan waxay baran doonaan wax badan oo ku saabsan danaha iyo kartida ilamahaaga iyo jadwalka qoyskaaga iyo mudnaantaada. Waxaa loo adeegsan doonaa natiijooyinka aad adiga jeceshahay in aad guul ka gaarto. Natiijooyinka waxay ka mid noqon doonaan qorshaha guud ee lagu adeegaayo qoyska. Natiijooyinkaas waxaa lagu qoray qoraal ku salaysan waxa ay rabaan in ay qoyskaaga sameeyaan iyo nidaamka dhabta ah ee qoyska iyo dhaqdhaqaaqyadooda. Waxay isticmaalayaan ereyadaada sidoo kale waxay xooga saarayaan waxyaalaha muhimka u ah qoyskaaga. Sidoo kale qorshahan wuxu sharxayaa adeeg kasoo kugu caawinayaa sidaad ku gaari lahayd natiyo.

Faa'ii dooyinka barnaamijkaan (Early Intervention)
Waqtiyadii ugu dambeeyey ama sanooyinkii ugu dambeeyey in ka badan 95% waalidiinta Gobolka Ohio kuwaaso loogu adeegay barnaamijkaan waxay sheegeen in ay awood u helaan in ay ka tageeraan caruurtooda barashada waxyaabaha cusub, barashada xirfado cusub.

